

## Kalaamidiya, hagitaanka bukaanka

- Kalaamidiya waa caabuq ay bakteeriyyada *Chlamydia trachomatis* sababto oo galmada lagu kala qaado.
- Kalaamidiya waa bakteeriyyada sababta inta badan cudurada galmada lagula kala qaado.
- Wakhtiga soo bixidda calaamadaha ee marka cudurka la qaado billowga astaamaha soo bixi karaa waa 1-3 todobaad, laakiin inta badan dadka cudurka qaaday malahan wax calaamad ah.
- Qaadista kalaamidiya waxaa looga hortagaa isticmaalka kondhomka iyo difaaca galmada afka. Waxaa wanaagsan, in galmada futada si gaar ah loogu isticmaalo kareemka sabiibaxa ee biyaha ama silikoonka ka samaysan. Kalaamidiya wuxuu si fudud looga qaadaa xuubka dhaawaca ah.

### Kalaamidiya waxaa lagu kala qaadaa

- Galmada siilka iyo futada
- Galmada afka
- Gacmaha, marka gacanta lagu taabto xubnaha taranka ama futada, kaddibna la taabto xubinta taranka, futada ama isha.
- Waxaa xittaa la kala qaadaa kalaamidiyaha aan calaamadaha lahayn. Cudurka aan calaamadda lahayn waxaa lagu caddayn karaa oo kaliya baaritaanka kalaamidiya.

### Calaamadaha

- Inta badan kalaamidiya waa calaamad la'aan.
- Calaamadda caabuqa marinka ilmagaleenku waxay noqon karaa dheecaanka cad ee dhashada oo aan caadi ahayn ama qoyaan yar oo dhiig leh oo ka soo difqa siilka.
- Caabuqa xuubka ilmagaleenka iyo tuubada ugxaanta waxay keeni karaa calool xanuun iyo dhiigga caadaha oo aan joogto ahayn.
- Xanfafka kaadida, qabashada kaadida oo isu dhowaata
- Qoyaan ka yimaada afka tuubada kaadida
- Caabuqa xaniin dheeraadka ayaa sababi kara baraka kiishka xaniinyada, guudadasho iyo xanuun. Xaniinta dusheeda ayaa laga garan karaa xaniin dheeraadka damqanaysa oo bararan.
- Cudurku waa mid aan inta badan calaamado ka soo bixin dhuunta iyo futada.
- Kalaamidiya wuxuu isagoo sii maraya qoyaanka iyo gacmaha ku dhici karaa indhaha isagoo sababaya caabuqa xuubka isha.

### Cilladaha dambe iyo cudurada laga qaadi karo

- Caabuqa gudaha ilmagaleenka ee xumadda wata wuxuu inta badan u yahay daryeelka isbitaalika.

- Caabuqa xaniin dheeraadka iyo ilmagaleenka guduuh waxay sababi karaa dhalmo la'aan, iyo caabuqa ilmagaleenka gudaha oo kordhiya halista uur ku dhashay qaybta bannaanka ee ilmagaleenka.
- Kalaamidiya wuxuu kicin karaa caabuqa kalagoyska.

### Baaritaanka iyo daaweynta

- Baaritaanka iyo daaweynta kalaamidiya waa mid lacag la'aan ka ah daryeelka caafimaadka dadweynaha.
- Kalaamidiya waxaa si fudud looga hela karaa saamiga kaadida ama qoriga yar ee afka suufka ku leh oo siilka looga soo qaado saami, tuubada kaadida, dhuunta, futada ama marinka ilmagaleenka, taas oo ku xiran habka galmaada ee la sameeyay.
- Kalaamidiya iyo jabtada waxaa laga baaraa hal saami. Waxaa sidoo kale lagu taliyaa in la qaado saamiga dhiigga/saamiyada dhiiga si loo hubsado cudurada kale ee galmaada lagu kala qaado.
- Kalaamidiya waxaa si lacag la'aan ah loogu daaweynta daawada antibiyootiga ah. Bukaanka waxaa daawada lagu siiyaa rugta caafimaadka.
- Ku wargeli lamaanayaashaada galmaada qaadista kalaamidiya, si ay u aadaan baaritaan iyo daaweyn.
  - Haddii aad qabto sawirka cudurka oo calaamadaha wata, ku wargeli lamaanayaashaada galmaada ee aad kulanteen inta aad calaamadaha qabtay iyo afar todobaad kahor billowga calaamadaha.
  - Haddii aanu cudurkaada calaamado lahayn, ku xisaabtan lix bilood oo ka horreysay cuduradii laga helay lamaanahaada galmaada.
- Waxaa lagu dadaalayaa in isku mar la daweyyo lamaanaha galmaada ee joogtada ah. Daaweyn waxaa la billabi karaa islamarka saamiga baaritaanka la qaado.
- Lix bilood kaddib daaweynta ayaa ka reysashada cudurka lagu xaqiijinayaa baaritaan cusub/baaritaanno cusub.
  - Saamiga koontaroolka ee wakhti hore la qaaday wuxuu sheegi karaa natijion bositif ah oo "khalad ah".
- **Waa in galmaada la iska ilaaliyo illaa ay billowga daawada ka soo wareegto todobaad.**
- **Waa muhiim in daaweynta kaddib la isticmaalo kondhom/difaaca galmaada afka illaa iyo laga gaarayo baaritaanka dambe.**